

## Karoonihii weli waa fidayaa

**Cudurkii safmarka ahaa weli ma dhamaan. Wixii samarka ka danbeeyey isqaadsiintii cudurku wey ku korodhay gobolka Kalmar. Hadda waxaa nasoo gaarey noocii Delta oo si fudud la isu qaadsiyo.**

38 000 oo qof oo gobolka deggan ayaan weli is talaalin. Dadkaa aan is talaalin waxay qatar ugu jiraan inay u xanuunsadaan cudurka, ayna sii fidiyaan. Waxa ugu muhiimsan ee aad samayn kartaa waa inaad is talaashaa. Sidaa waxaa tiri dhakhtaradda cudurada faafa Lisa Labbé Sandelin.

### Qaado labada talaal

Waa muhiim in labada talaalba la qaataa. Markaas ayaad difaac fiican oo mudana gaara heleysaa haddaad xanuunsato. Waxaad kalood caawinaysaa hay'adda caafimaadka oo ka bad baadaya iney daaweeyaan dad badan oo xanuunsada mar qura.

Dhammaan dadka da'doodu tahay 16 jir iyo wixii ka sareeyaa wey is talaali karaan. Kadalbo waqtiga iyo goobta talaalka beyjka internetka ee 1177.se. Malaha waqti banaan hadda? Taas macnaheedu waa si ku meel gaar ah ayuu waqtigu u dhamaaday. Marka ugu horeysa ee xaruntu hesho daawada talaalka ayaad waqti sameysan kartaa. Xarumaha talaalka qaarkood umaba baahna in waqti loo sameysto oo waad iska tegi kartaa.

Haddii aad su'aal ka qabto talaalka ammaba aad u baahantahay caawimaad waxaad wici kartaa 0480-844 44 (waa luqadda Iswiidhishka oo kelya warbixinta), qofka ka yar 18 waa inuu fasax ka haystaa waalidkii talaalka. Foomka waxaad ka heli kartaa beyjka 1177.se.

### Carrurta iyo dhalintu waxay tagayaan iskuulka.

Laga bilaabo sanad dugsiyeedka xilliga dayrta waxbarashadu waxay ka dhacaysaa iskuulka. Laakiin markay dadbadani ku kulmaan iskuulka ama goobta shaqada, fasaxa ka dib waxaa khatar ah is qaadsiinta nooca delta ee cudurka karoonaha.

Haddii cudurka laga helo iskuulka waxay hay'adda caafimaadka ama dhakhtarka cudurada faafa amrayaan in wax barashadu ka socoto guriga si fogaan ah. Iskuulkaada iyo degmadaada ayaa ku siinaya wixii warbixin ah. Sidoo kale warbixin faah faahsan waxaad ka heli kartaa beyjka internetka ee degmadaada.

### Talooyinka waa in aynu sidii hore u raacnaa:

- Kala fogaada qaasatan gudaha marka lagu jiro.
- Guriga ku ekow hadaad xanuunsan tahay, xataa hadii aad duraysan tahay, isna baar.
- Xataa dadka talaalan waa iney guriga ku ekaadan hadey isku arkaan calaamadaha cudurka. Qofkaasi wuu gudbin karaa xataa hadii uusan xanuunsaneyn.
- Ka fogow meelaha dadka badani joogaan.
- La kulan oo keliya dadkaad horey u kulmi jiteen. Dibaddana u baxa markaas.
- Gacmaha in badan iska dhaq.

### Warbxin luqadaha kale ee aan Iswiidhishka ahayn waxaad ka heli kartaa beyjkan:

- [www.1177.se](http://www.1177.se)
- [www.Krisinformation.se](http://www.Krisinformation.se)

### Wargeysyo badan oo waxa ka cusub karoonaha

Hay'adda caafimaadku waxay leedahay waa inaynu ku soconaa inaan raacno talooyinka jira ilaa inta ka dhiman sanadka. Wargeyska kan xiga ee waxa ka cusub karoonaha wuxuu soo baxayaa haddii ay timaado wax cusub oo muhiim ahina soo kordhaan.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.

Qoraalkan warbixinta ah waxaa soo diyaariyey, hay'adda xaaladaha degdegga ah ee gobolka. Hay'adda xaaladda deg degga ah ee gobolka Kalmar waa wada shaqeyn ka dhaxaysa dhammaan degmooyinka gobolka, gobolka, hay'adda caafimaadka ee gobolka iyo mas'uuliyiin kale oo gobolka ah. Markay xaalad deg deg ahi ka dhex dhacdo bulshada, si wada jir ah baynu isu caawinnaa.



[facebook.com/krissamverkan.kalmar](https://facebook.com/krissamverkan.kalmar)